

SHARCI L. 21, Tr. 8 Febaraayo 1975.
Beddelidda Magaca Bankiga Qaranka Soomaaliyeed.

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka iyo Sharciga Lr. - ee 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY Sharciga Lr. 27 ee 26kii Nofeembar 1968 oo lagu dhisay Bankiga Qaranka Soomaaliyeed;

ISAGO TIXGELINAYA Go'aannadii Golaha Sare ee Kacaanka iyo kan Xoghayayaasha Dawladda fadhigoodi wadajirka ahaa ee odii Febaraayo 1975.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 2aad

Laga bilaabo 8da Febaraayo 1975 magaca Bankiga Qaranka Soomaaliyeed waxaa loo beddeley Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

Qodobka 1aad

Sharcigaan wuxuu hirgalayaa 8da Febaraayo 1975 waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga Ah ee Dawladda.

Muqdisho, 8 Febaraayo 1975.

GUDDOONSHAHA
GOLAHA SARE EE KACAANKA
Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

SHARCI L. 22, Tr. 23 Febberayo 1975.
Dhisidda Wakaaladda Hawlaha Maraakiibta ee Soomaaliyeed.
(Somali Shipping Agency).

GUDDOONSHAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO TIXGELINYAY Go'aankii G.S.K. yo Golaha Xoghayayaasha;